

# Daryeelka caafimaadka ee dib diirada loo saaray: Sii wadista wadhadalka

Janaayo 09, 2025 [Weydiimaha saxaafadda](#)

Dadka reer Alberta waxaa lagu casuumayaa inay nala wadaagaan aragtiyadooda maadaama shaqadu sii wadayso inay diiradda dib usii saarto sidoo kalena hagaajiso nidaamka daryeelka caafimaadka ee gobolka.

Bishii Noofambar 2023, dowladda Alberta ayaa shaaciyay qorshaha in ay dib diiradda u saarayso nidaamka daryeelka caafimaadka si loo xoojiyo adeegyada, awoodda go'aan gaarista dadka deegaanka, hagaajinta taageerada la siiyo shaqaalaha gurmada degdega ah iyo hagaajinta natiijooyinka caafimaadka ee guud ahaan dadka reer Alberta. Intii hanaankaan lagu jiray, dowladdu waxay qabatay kulamada dadweynaha ee tooska ah waxayna isticmaashay agabyada onleenka ah si ay uga caawiyaan soo uruurinta aragtida iyo wax ku biirinta nidaamka cusub ee laga soo uruurinayo dadka reer Alberta iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka.

Dowladda Alberta waxaa ka go'an inay isticmaasho aragtida iyo khibradaha dadka reer Alberta si ay u diyaariso nidaamka cusub, waxayna qaban doontaa wareegga labaad is aragga, oo ay ku jiraan kulamada bulshada ee tooska ah, oo bilaabanaya Janaayo 21. Marka laga tago kala warqaadshada dadka reer Alberta ee shaqada dib diirada u saaristii ugu danbaysay iyo waxa ay uga dhigantahay, kulamadaanu waxay soo uruurin doonaan aragtiyada ku saabsan helitaanka daryeelka caafimaadka iyo xaaladda hadda ee shaqaalaha daryeelka caafimaadka, iyo soo saarista fursadaha lagu hormarin karo go'aan gaarista dadka deegaanka.

“Ilaa iyo bilowgii, waxaa naga go'ayd inaan dhisno nidaam daryeel caafimaad oo u adeegaya qof walba oo reer Alberta ah. Ayada oo wadhadalka lasii wadayo, waxaan xaqiijinaynaa in khibradahooda, aragtiyadooda iyo waaya-aragnimadoodu ka dhex muuqdaan go'aan gaaristeena.”

*Adriana LaGrange, Wasiirka Caafimaadka*

Laga bilaabo bishaan, dhammaanba dadka reer Alberta waxaa lagu casuumayaa inay ka qaybqaataan mid kamid ah kulamada islafalgalidda ah ee gobolka oo dhan lagu qabanayo. Jadwalka waxaa laga heli karaa onleenka isdiiwaangalinta kulamaduna waxay ka furantahay hadda alberta.ca.

Natijoooyinkii kasoo baxa kulamadii ugu horeeyay, oo lagu soo koobayo warbixinta What We Heard (Wixii Aan Maqalnay), ayaa gacan ka gaystay hagitaanka naqshadda iyo meelmarinta dib diirada u saarista nidaamka daryeelka caafimaadka. Natijoooyinka kasoo baxa wareega labaad ee is-aragyada ayaa macluumaad sii siin doona shaqadaan.

Ilaa iyo wixii ka danbeeyay wareegii koowaad ee is-aragyada, dowladda Alberta waxay daahfurtay hay'adaha caafimaadka gobolka Recovery Alberta and Primary Care Alberta, waxay ku dhawaaqday Acute Care Alberta (Daryeelka Degdega ah ee Alberta), waxay meelmarisay wax ka badalo sharci si loo taageero u wareegista nidaamka cusub waxayna sii wadaysaa ka shaqaynta samaynta hay'ad caafimaad oo gobolku leeyahay oo nolosha gacan ka gaysata iyo golaha talo bixinta gobolka.

Dadka reer Alberta ee danaynaya inay la socdaan nidaamka daryeelka caafimaadka ee ugu danbeeyay dib diirada u saarista iyo fursadaha ka qaybgalku waxay iska diiwaangalin karaan akhbaaraadka elektorooniga ah.

## Xaqiiqooyin kooban

- Wareegii hore ee ka qaybgalka, la qabtay intii u dhexaysay Janaayo iyo Juun 2024, waxaa kujiray 65 kulamo dadweyne oo toos ah oo lagu qabtay gobolka oo dhan. Ku dhawaad 3,000 oo reer Alberta ah, shaqaalaha daryeelka caafimaadka, bukaano iyo daryeel bixiyeyaal ayaa ka qaybgalay kulamadaan.
  - In ka badan 18,000 oo qof ayaa sidoo kale onleenka nagula wadaagay aragtidooda ku dhawaad 10,000 oo qof ayaana ka qaybqaatay kulamada onleenka ah.
  - Marka laga tago kulamada bulshadu kasoo qaybgashay, kulamo gaar ah ayaa lala qaatay bulshooyinka Asalka ah, bulshada faransiiska ku hadasha iyo saaxiibada kale ee muhiimka ah.

## Macluumaadka la xidhiidha

- [Jadwalka iyo isdiiwaangalinta onleenka ah](#)

- [Warbixinta Waxa Aan Maqalnay](#)
- [Dib diirada u saarista daryeelka caafimaadka ee Alberta | Ka qaybgalka Onleenka ah ee Alberta](#)
- [Akhbaarta dib diirada u saarista daryeelka caafimaadka](#)
- [Dib usoo kabashada Alberta](#)
- [Daryeelka Aasaasiga ah ee Alberta](#)

## Wararka la xiriira

- [Xaqiijinta nidaamka caafimaadka oo si guul ah dib diirada loogu saaray \(Noofambar 18, 2024\)](#)
- [Ku hogaaminta daryeelka aasaasiga ah mustaqbalka \(Oktoobar 15, 2024\)](#)
- [Aragtida reer Alberta waxay qaabaynaysaa dib diirada u saarista daryeelka caafimaadka \(Oktoobar 11, 2024\)](#)

## Su'aalaha warbaahinta

### Jessi Rampton

780-427-2137  
Xoghayaha Warfaafinta, Caafimaadka